XUQUUQDA IYO MASUULIYADAHA

Rights & Responsibilities - Somali

icare | Southern Health

integrity • compassion • accountability • respect • excellence

Better Health for Our Community

Waa ay habboon tahay inaad ogaataa waxa aad ka filaysid Caafimaadka Koonfureed, adeegyadeeda iyo shaqaalaha iyo masuuliyaddaada inta laguu adeegayo. Buug war-bixineedkani wuxuu muujinayaa xuquuqdaada iyo masuuliyadahaaga maadaama aad tahay macaamiisha adeegyada daryeelka caafimaadka Koonfureed.

WAXAAD XAQ U LEEDAHAY

Daryeel caafimaad oo heer sare ah

- Ka qaybgalka go'aammada la xiriira daryeelka caafimaadkaaga.
- Doorashada haddii aad rabtid daweynta bulshada ama midka gaar-ahaaneed ee lacagta.
- Helitaanka adeegyo kala duwan
- Inaad soo gudbin kartid dawcad ama bogaadin

Adeegyada tixgelinaya dhaqankaaga iyo baahida xiriirkaaga

- Helitaanka aqoonyahannada turjumaannada caafimaadka
- Adeegyo lagu bixinayo tixgelinta dhaqankaaga

Helitaanka daryeelka qura ama daweynta aad ogolaanshaha ka bixisay

- Diidmada inaad qaadato daryeel ama daweyn (Qaar ka mid ah bukanayaasha hoos yimaada Sharciga Caafimaadka Maskaxda ma diidi karaan daweyn).
- Go'aansashada inay ardadu ka qaybgali karaan daryeelka caafimaadkaaga ee kamid noqonaysa tababarkooda.
- Go'aansashada inaad ka qayb qaadanaysid mashruuc cilmi-baaris

Macluumaad sugan ee laxiriira xaaladdaada iyo maaraynteada

- Degdeg u helidda, jawaabo macnaleh ee su'aalahaaga ama walaaca aad ka muujiso daryeelka caafimaadkaaga
- In laguu sheego khatarta iyo wanaagga ay leedahay daweyntaadu iyo waxyaabaha beddel u noqon kara.
- Helitaanka diiwaannada Caafimaadka Koonfureed adigoo u maraya Sharciga Xorrinimmada Macluumaadka ee 1982

Sharafta iyo Xushmadda daryeelkaaga

- Tixgelinta baahidaada gaar-ahaaneed.
- Helitaanka daryeel aan ku salaysnayn takoor ama gar-naq.
- In lagu baro dhammaan shaqaalaha ku hawlan daryeelkaaga.

Sirta iyo qarsoodiga

- Tixgelinta sirtaada iyo in macluumaadka caafimaadkaaga loo dhawro si qarsoodi ah.
- Sugitaanka kaydinta iyo dayactirka diiwaannadaada caafimaadka
- U hoggaansamidda shuruudaha sharciga sirta ee Caafimaadka Koonfureed.

Deegaan badbaadsan

- Adeegyo ku salaysan deegaanno furan, nadiif ah, nadab ahoo sugan.

Ra'yi labaad

- Inaad codsato ood heshid ra'yi labaad ee laxiriira daryeelka caafimaadkaaga.

Taageeridda qofkii aad dooratid inaad kala hadashid daryeelkaaga

- Taageerahaagu inuu kala qaybgalo fadhiyada iyo doodaha shaqaalaha.
- Horayba inaad u dooratid qof go'aamin kara daryeelkaaga caafimaad haddiiba iyo markii aad yeeli weydo adigu.

In laguu sheego haddii kharash lagaaga baahdo adeegyada daryeelka caafimaadkaaga.

WAXAY MASUULIYADI KAA SAARANTAHAY INAAD

Iskaashi la yeelato kooxdaada daweynta

- Dhawrtid ballamada laguu sameeyey.
- Fahamtid ciribxumada ay leedahay go'aan aad ku diiddid daryeel ama daweyn.

Bixiso, intii kartidaada ah, macluumaad wax ka tari kara daweyntaada

- Ka bixi macluumaad sax ah naftaada iyo taariikhda caafimaadka qoyskiinna; oy weheliso daaweyn, daroogooyin, hagaajimo ama walxo aad qaadatid.

Inoo sheeg markii aad su'aalo ama walaac ka qabtid daryeelkaaga

- Su'aalo na weyddii si aynu kuu famahsiinno xaaladda caafimaadkaaga, daweyntaada iyo daryeelkaaga.

Nagu ayid inaynu ku siinno deegaan nabadgelyo leh, nadiif ah ee la jeclaysto

- Raac qaanuunnada la xiriira meelaha aan wax lagu qiiqin Karin iyo mamnuucidda aalkolada iyo daroogooyinka sharcidarrada ah ee agagaarka Caafimaadka Koonfureed.
- Buuqa aad u yaree adigoo tixgelinaya dadka jooga agagaarkaaga.
- U ogolow shaqaaluhu inay u isticmaalaan qalabka inay kugu qaadaan ama dhaqaajiyaan.
- Alaabtaada qaaliga ah kusoo reeb guriga maadaama aanay Caafimaadka Koonfureed ogolaanaynin masuuliyadda wixii luma ama waxyeello ku gaadho goobtaas.

Muuji tixgelinta dadka ku daryeelaya iyo kuwa ka faa'iidaysanaya adeeggeenna

- Tixgeli sirta, baahida iyo sharafta dadka kale adigoo muujinaya edboonaan iyo qaddarin.
- Tixgeli saacadaheenna booqashada, raacna xeerarka u deggan martida

Biilasha ku bixi waqti habboon Kaarka Meedikeerkana bixi markii loo baahdo

- La imaw faafaahin haddii aad ku jirtid caymiska caafimaadka gaar-ahaaneed.

BOGAADIN, FAALLOOYIN IYO WALAACYO

Caafimaadka Koonfureed wuxuu maqsuud ka yahay dhammaan jawaab-celintii adeegyada iyo daryeellada ay baxshaan. Jawaab-celimmada la helo waxaa loo isticmaalaa horumarinta tayada adeegyadeenna. Macluumaad kastoo la baixiyaa waxba uma dhimayo daryeelkaaga. Waxaa laguula dhaqmi doonaa si xushmad leh, jawaab-celintaadana waqtideedaa wax laga qaban doonaa.

Haddii walaac ku hayo waxa aad yeeli kadhid:

- Ugu horreyn, toos ula hadal qof shaqaalaha kamid ah ee daryeelkaaga ku shaqo leh ama ka ah masuul aaggaas.
- Haddii aad damacdid inaad dacwootid, waxaad la hadli kadhaa Sarkaalka Xiriirka Dacwooyinka:

Xarunta Caafimaadka Moonash ee Kalayton	**9594 2702**
Xarunta Caafimaadka Moonash ee Mooraabin	**9928 8584**
Isbitaalka Dandenong	**9554 8078**
Kingston	**9265 1000**
Isbitaalka Kaasey	**8768 1200**

Caafimaadka Bulshada (Fadlan la xiriir aagga ay khuseyso)

- Haddii aad dacwaddaada ka dhigayso qoraal, fadlan kusoo hagaaji warqaddaada:

  Complaints and Compliments
  Southern Health
  Locked Bag 29
  Clayton South VIC 3169

  ama iimeel ugu dir:
  feedback@southernhealth.org.au

- Haddaad rumaysantahay walaacaagii inuusan Caafimaadka Koonfureed wax fiican ka qaban, waxaad la xiriiri kadhaa:

  The Health Services Commissioner
  (Wakiilka Adeegyada Caafimaadka)
  Level 30, 570 Bourke Street
  Melbourne VIC 3000
  Telefoon: 8601 5200 oppure
  Telefoonka lacag la'aanta: 1800 136 006

SIRTA IYO QARSOODIGA

Caafimaadka Koonfureed waxaa looga baahanyahay uruurinta, gacan ku haynta iyo xafidaadda macluumaadka caafimaadka si waafaqsan Sharciga Diiwaannada Caafimaadka ee 2001.
Sharcigan iyo Sharciga Xurriyadda Macluumaadka 1982 ayaa xaq kuu siinaya inaad hesho diiwaanka caafimaadkaaga. Si aad u codsatid diiwaanka caafimaadkaaga, fadlan u qor:

The FOI Officer
Southern Health
Locked Bag 29
Clayton South VIC 3169

Caafimaadka Koonfureed asagoon ogolaansho kaa haysan ayuu macluumaadka caafimaadkaaga isticmaali karaa:

- Haddii loo baahdo si shaqaaluhu si nabad leh oo habboon kuu daweeyo
- Maalgelin darted, maamulid, qorshayn, ilaalayn, horumarin ama qiimaynta adeegyada caafimaad ee lagu siiyo. Lagumase muujin karo.
- Ama cilmi-baaris ay ogolaadeen Guddiga Anshaxa. Waxay qiimayn doonaan mashruuc walba ee cilmi-baaris wayna dhawri doonaan sirta shakhsiyaadka ka qaybgelin doona
- Halkii looga baahdo sharciga, faafaahinta bukanaha waxaynu siinnaa Bulshada LaanQayrta Cas ee Awstraaliya si ay ubaadi goobaan dhiig ama walxaha laga curiyo dhiigga. Waxaa jira hab qaanuuneed looga war bixiyo ilmihii loo arko inay Qatar ku jiraan. Cudurrada lays qaadsiiyo qaarkood waa in la ogeysiiyaa Waaxda Adeegyada Aadanaha.

Caafimaadka Koonfureed wuu kaa hor istaagi karaa dhammaan, ama qayb ka mid ah, diiwaanka caafimaadkaaga haddii aynu rumaysannahay, annagoo arrimo macquul ah u cuskanayna, haddii aynu yeelno sidaas, inay khatar xun u keeni kadho nafta ama caafimaadka qofka (oy taaduna weheliso). Caafimaadka Koonfureed wuxuu kaloo kaa hor istaagi karaa macluumaad uu qof kale si qarsoodi ah inoo siiyey, sida saaxiib ama qaraabo.

Haddii aad su'aalo ka qabtid uruurinta, isticmaalka iyo kashifaadda macluumaadka caafimaadkaaga, fadlan kala xiriir Sarkaalka Macluumaadka Xorta ah ee Caafimaadka Koonfureed (03) 9594 2123.

The Rights and Responsibilities brochure is available in your language. Please ask a staff member at Reception.

Arabic

منشور الحقوق والمسؤوليات متوافر بلغتكم. أطلبوه من العاملين في مكتب الاستقبال.

Cambodian

កូនសៀវភៅស្តីអំពីសិទ្ធិនិងការទទួលខុសត្រូវនេះ មានផ្តល់ជូនជាភាសារបស់លោកអ្នក។ សូមសាកសួរសមាជិកបុគ្គលិកនៅកន្លែងទទួលភ្ញៀវ។

Chinese

《權利和責任》小冊子有您所說語言的版本,請到接待處向工作人員查詢。

Croatian

Brošura o pravima i odgovornostima može se dobiti i na vašem jeziku. Molimo zatražite je od člana osoblja na recepciji.

Dari

جزوه حقوق و مسئولیتها بلسان شما فراهم میباشد. لطفاً از یك كارمند میز پذیرش مراجعین پرسان نمائید.

Greek

Το φυλλάδιο μας "Δικαιώματα και Υποχρεώσεις" διατίθεται στα ελληνικά. Παρακαλούμε να ζητήσετε ένα από τα μέλη του προσωπικού στην Ρεσεψιόν.

Italian

L'opuscolo Diritti e Responsabilità è disponibile nella tua lingua. Rivolgiti al personale presso il banco accettazione (Reception).

Russian

Брошюра «Права и обязанности» имеется на вашем родном языке. Обратитесь к нашему работнику у приемной стойки.

Serbian

Брошура "Права и одговорности" је на располагању на вашем језику. Молимо вас потражите је од службеника на рецепцији.

Somali

Buugga yare ee Xuquuqda iyo Masuuliyadaha waxaa lagu heli karaa luqaddaada. Fadlan weyddiiso shaqaalaha jooga Soo-dhaweynta.

Spanish

El folleto Derechos y Responsabilidades está disponible en su idioma. Pídalo al personal de Recepción.

Turkish

Haklarınız ve Sorumluluklarınız broşürü sizin dilinizde de bulunmaktadır. Lütfen görevli bir memura veya danışma masasına sorunuz.

Vietnamese

Tại đây có sẵn tài liệu Quyền và Trách Nhiệm bằng Việt Ngữ. Xin hỏi nhân viên ở quầy tiếp tân.